

DOORASHADA 2020

Codbixinta
Noofembar 3

Hage Si Dhibyar Loo Akhriyi Karo



MAXAA KU JIRA:

Maxaa loo codbixiyaa?	3
Isu Diiwaangelinta Codbixinta	4
Inta aadan Codbixin	9
Goobta Codbixinta	12
Codbixin Dagdag ah	14
Codbixin Doorasho La Kala Sarreysiiyey	16
Warqad Codayn oo Tusaale ah	18
Codaynta Adigoo Maqan	20
Murashaxiinta	22



FAAHFAAHIN KU SAABSAN HAGAHAN

Sanduuqa Dhaqaakaha ee Ururka Haweenka Codeeya ee Maine (The League of Women Voters of Maine Education Fund) waxa farxad u ah in Maine oo dhan ay ku qaybiyaan kumanaan nuskhadood oo ah hagahan.

Warbixintani xisbina ma tageersana. Taas micnaheedu waxa weeye in hagahani uuna taageerayn ama ka soo horjeedin murashax ama xisbi siyaasadeed.

Dhamaan weedha murashaxiintu na siiyeen waxba kama ayna baddalin Sanduuqa Dhaqaakaha ee Ururka Haweenka Codeeya ee Maine. Weedhaha murashaxiintu kaga jawaabayaan su'aal kasta oo doorasho ee halkan ku jirtaa ma matalayo aragtida Ururka ama hay'adaha ka qayb qaatay qaybinta buuggan, oo ay ku jiraan dugsiyada, maktabadaha, hay'aha samfalka, ama hay'ado kale.

Su'aalaha & Nuskhadaha Hagahan

Haddii aad su'aal qabtid naga soo wac 207-622-0256 khadka 2 ama E-mayl u dir voterguide@lwvme.org.

Hagahan waxad ka heli kartaa www.lwvme.org. Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan doorashada gobolka iyo deegaanka waxaad ka heli kartaa www.Vote411.org.



Maxaa loo codeeyaa?

Waxaad isbeddel wayn ka samayn kartaa habka magaaladaada, gobolkaaga iyo waddanka loo maamulo.

Codayntaydu qarsoodi ma tahay?

Haa, codayntaadu waa qarsoodi. Qofna ma ogaanayo sidaad u codaysay haddii aadan u sheegin.

Yaa codayn kara?

Maine waxaad codayn kartaa haddii aad:

- Tahay muwaaddin Maraykan ah
- Daggan tahay Maine.
- Tahayna 18 jir ama ka wayn

Waa inaad marka hore is diiwaangelisaa. Bogga kan ku xiga ka fiiri sida la isu diiwwangeliyo.

Maxaan u codayn doonaa?

Talaadada, Noofembar 3, codbixiyeyaasha Maine waxay dooran doonaan:

- Madaxweynaha Maraykanka
- Xubin ka mid Golaha Odyaasha Qaranka oo Maine matalaya
- Golaha Shacabka Qaranka ee Deegaanka 1aad iyo
- Ka Deegaanka 2aad
- Xildhibaannada Golaha Sare iyo
- Kuwa Aqalka Hoose (Golaha Shacabka) ee Maine
- Murashaxiinta degmooyinka, deegaannada, iyo xaafadaha iyo waliba afti ka bixinta

Waa goorma Maalinta Doorashadu?

Maalinta Doorashadu waa Talaadada, Noofembar 3, 2020.

Isu Diiwaangelinta Codaynta

Sideen isu diiwaangeliya si aan u codeeyo?

Waxaad isu diiwaangelin kartaa inaad codayso Maine haddii:

- Aad tahay 18 jir ama ka weyn oo muwaaddin Marayka ah, degenna Maine.
- Aad tahay 17 jir noqon doonaa 18 Maalinta Doorashada.
- Haddii aad tahay 16, wali waxaad buuxin kartaa kaarka is-diiwaagelinta, waxaanad xaq u yeelan doontaa inaad codayso markaa noqoto 18.

Dadka lagu xukumay danbi ama ku jira xabsigu weli way codayn karaan. Haddii aad xabsi ku jirto, waxaad iska diiwaangelin kartaa magaaladii aad dagganayd intaan lagu soo xirin si aad u codayso, waxaad u codaynaysaa sida qof maqan (faahfaahin dheeraad ah ka fiiri BOGGA 20).

Dadka hoy-laawaha ah way codayn karaan. Haddii aad tahay hoy-laawe, waxaad iska diiwaangelin kartaa meesha aad seexato xaafadda ay ka tirsan tahay. Taasi waxay noqon kartaa guryaha dadka hoy-laaweyaasha ah, guri aad saaxiib la daggan tahay, ama bannaanka.

Isu Diiwaangelinta Codaynta

Waxaad u baahan doontaa Aqoonsi Sawir leh iyo caddayn meesha aad daggan tahay.

Waxa ka mid ah Aqoonsiga Sawirka leh:

- Aqoonsi dowladdu bixisay oo sawir leh (sida Liisanka Baabuur-wadista, Aqoonsiga Gobolka, Baasaboorka Maraykanka ama Aqoonsiga Milatariga)
- Aqoonsiga Dowladda oo aan lahayn sawir (sida warqadda dhalashada ama kaarka sooshalka oo saxeexan)
- Kaar dowli ah oo muujinaya magaca iyo cinwaanka codbixiyaha (sida kaarka caydha, biilasha korantata iwm., waraaqaha xisaabaadka bankiga, jeeg dowladda ka yimid, ama jeegga shirkadda aad u shaqayso)
- Lambar khaas ah oo lagugu aqoonsan karo (Sida lambarka liisanka baabuur-wadista ee Maine ama afarta lambar ee u danbeeya sooshalkaaga)

Waxyaabaha caddayn kara deegaankaaga waxa ka mid ah kuwan hoose:

- Caddayn qoraal ah oo aad ku muujinayso meel aad dagi doonto
- Meel aad haatan daggan tahay nooc kasta oo ay tahay
- Meel aad gaarigaaga ku diiwaangelisay (haddii aad baabuur leedahay)
- Warqadda canshuur-celintaadii u danbeysay oo muujinaysa cinwaankaaga
- Cinwaanka la daggan yahay ee boostadu kuugu timaad
- Cinwaanka la daggan yahay ee kuugu qoran liisanka ugaarsiga ama kalluumaysiga
- Cinwaanka la daggan yahay ee ku muujisan liisnakaaga
- Mutaysigaaga gargaarka dadweyne (caydha) ee ku xiran deegaankaaga
- Wax Alla wixii kale ee caddayn ah ee muujinaya meesha aad daggan tahay

Isu Diiwaangelinta Codaynta

Waxaad isu diiwaangelin kartaa si aad u codayso doorashada Noofembar 3:

- Adigoo boostada dhigaya. Waa in karaaniga magaaladaadu is-diiwaangelintaada helaa ugu danbayn Oktoobar 19.
- Aad iska qorto goob diiwaangelin ka hor Oktoobar 19. (Xanuunka COVID dartiis waxa jiri doona goobo is-diiwaangelin oo sidii hore kayar.)
- Xafiiska Waaxda Gaadiidka.
- Adigoo taga xafiiska dowladda hoose mar kasta oo aad doonto, oo ay ku jirto Maalinta Doorshada ee Noofembar 3, 2020
- Adigoo isticmaalaya hay'ad kale ilaa laga gaaro Oktoobar 12.
- Goobta codbixinta ee xaafaddaada Maalinta Codbixinta ee Noofembar 3, 2020.

Isticmaal cinwaakan oo daabac kaarka codbixinta:

<https://www.maine.gov/sos/cec/elec/images/VoterRegistrationCard20.pdf>

Waa inaad buuxiso kaarka is-diiwaangelinta:

- Waa inaad buuxiso xagga hore iyo xagga danbeba.
- Saxeex taariikhna ku dhig.
- Khasab ma aha inaad xisbi siyaasi ah ku biirto si aad u codayso. Haddii aadan doonayn inaad xisbi siyaas ku biirto, calaamadee halka ay kaarka kaga taallo “Unenrolled” (Ma diiwaangashani).
- Fiiri BOGAGGA 7-8 si aad uga dheegato sida loo buuxiyo kaarka is-diiwanglinta codaynta.

Kaarka Diiwaangelinta Codbixiyaha

MAINE VOTER REGISTRATION APPLICATION				PARTY AFFILIATION	2
 Federally required questions: <ul style="list-style-type: none"> • Are you a citizen of the United States of America? * <input type="checkbox"/> YES <input type="checkbox"/> NO *If NO, DO NOT complete this application. • Are you at least 18 years of age? ** <input type="checkbox"/> YES <input type="checkbox"/> NO **If NO, but you are at least 16 years of age, you may pre-register to vote. 				<input type="checkbox"/> Democratic <input type="checkbox"/> Green Independent <input type="checkbox"/> Republican <input type="checkbox"/> Other qualifying party: <input type="checkbox"/> Unenrolled (no party choice)	1
3	LAST NAME	FIRST NAME	MIDDLE NAME	DATE OF BIRTH / / MM DD YYYY	4
5a	CURRENT RESIDENCE ADDRESS (Physical address where you live)				
5b	STREET NAME AND NUMBER, <u>NOT</u> A P.O. BOX		CITY, TOWN, PLANTATION OR TOWNSHIP		
5c	CURRENT MAILING ADDRESS (Complete if different from above address)				
	STREET NAME AND NUMBER, OR P.O. BOX, etc.		CITY/TOWN	ZIP CODE	
	Have you previously been registered to vote? If the answer is "yes" provide address of previous registration below.		<input type="checkbox"/> YES <input type="checkbox"/> NO	TELEPHONE (Optional)	
	CITY/TOWN	COUNTY	STATE		
COMPLETE BOTH SIDES OF THIS CARD – PLEASE PRINT					

MAINE VOTER REGISTRATION APPLICATION - COMPLETE BOTH SIDES OF THIS CARD -			
6	CHANGE OF NAME (Prior legal name, if applicable) <hr/> LAST <input type="text"/> FIRST <input type="text"/> MIDDLE <input type="text"/> SIGN AND DATE THIS CARD. I certify that all the information I have provided on this form is true. <hr/> Signature of Applicant on line above <input type="text"/> Date on line above <input type="text"/>		
7a	VOTER ID: By federal law, <u>NEW Maine voters</u> must provide an applicable ID number as follows: 1. Your <u>Maine driver's license/Maine State ID</u> ; or 2. The last 4 digits of your Social Security number (<u>ONLY</u> if you don't have a <u>Maine driver's license/Maine State ID</u>); or 3. Write "none" ONLY if you don't have either 1 or 2. <hr/>		
7b			
7c			
8	REGISTRAR'S USE ONLY: Date Received: _____ Ward-Precinct: _____ - _____ Source of Registration: <input type="checkbox"/> In Person <input type="checkbox"/> By Mail <input type="checkbox"/> Agency <input type="checkbox"/> BMV <input type="checkbox"/> Voter Registration Drive/3 rd Person Type of Registration: <input type="checkbox"/> <u>NEW Maine Voter Registration</u> Form of Proof for ID: _____ for Residency: _____ <input type="checkbox"/> <u>Change of Existing Voter Registration (check boxes below)</u> Form of Proof for Residency: _____ <input type="checkbox"/> Address Change to new municipality <input type="checkbox"/> Address Change within municipality <input type="checkbox"/> Party Enrollment Change <input type="checkbox"/> Name Change <input type="checkbox"/> Other Change _____ <input type="checkbox"/> <u>Duplicate Application</u> (no changes made)		
INSTRUCTIONS TO VOTERS: Failure to complete this entire application may prevent registration.			
<ul style="list-style-type: none"> • Deliver or mail this completed card to your municipal registrar or to the Division of Elections: #101 State House Station, Augusta, ME 04333-0101. This properly completed application must be received by the municipal registrar 21 days or more before an election. <u>If less than 21 days before an election, you must register in person.</u> • If you are a NEW Maine voter and mail this card, you must include a photocopy of your Maine driver's license, Maine State ID, or current utility bill, bank statement or government document that shows your name and address. • For election information, call 207-624-7650 or visit www.maine.gov/sos/cec/elec/ (rev. 1/20) 			

Kaarka Diiwaangelinta Codbixiyaha

1 KA JAWAAB LABA SU'AALOOD. Waa inaad labadaba uga jawaabto “haa” si aad isu diiwaangeliso.

2 XISBIGA. Dooro mid ka mid ah liiska: Xisbi Maine laga aqoonsaday, Xisbi ku guda jira aqoonsiga, ama dooro “Xisbi kuma jiro”.

3 MAGACA. Magaca Awowga iyo Magacaaga, ama Xarafka u horreeya magacaaga iyo Magaca Abbahaa.

4 TAARIKHDA DHALASHADA. Waa inaad tahay 18 jir Maalinta Doorashada si aad u codayn karto.

CINWAANKA.

Cinwaaka Guriga aad Deggen Tahay:

Jidka ama goobta aad ku nooshahay (Oo aan ahayn Sanduuq Boosto)

Cinwaankaaga Boostada:

Waa haddii uu ka duwan yahay ka aad daggan tahay (Wuxuu noqon karaa Sanduuq Boosto)

Cinwaankaagii Hore:

Haddii aad hore u diiwangashanayd oo aad guurtay waa inaad “haa” dhahdo si aad u sheegto magaaladii, degmadii iyo gobolkii hore.

6 SAXEEXA CODBIXIYAHAA. Waa inaad saxeexdo taariikhdana ku qorto.

AQOONSIGA CODBIXIYAHAA.

Lambarka Liisanka Baabuurka ama Aqoonsiga Maine:

Codbixiyeyaasha cusub ee haysta mid kuwan ka mid ah waa inay lambarradan midkood qoraan.

Lambarka Caymiska Bulshada (Sooshal Sekuriti “SSN”):

Codbixiyeyaasha cusub oo aan haysan liisanka ama aqoonsiga Maine waa inay qoraan afarta lambar ee ugu danbeeyaa Sooshalka (SSN).

Midna:

Kaliya codbixiyeyaasha aan haysan liisanka ama aqoonsiga Maine ayaa ku qori kara “None” (Midna).

8 DIIWAANGELIN BOOSTADA LAGU DIRO.

Codbisiyeyaasha cusub ee diiwaangelinta ku soo dira boostadu, waa inay soo raaciyaan sawirka aqoonsiga (Sida liisanka dirawalka), kaarka is-diiwaangelinta iyo dokumenti muujinaya halka ay daggan yihiin.

Inta aadan Codbixin

Xaggeen ka codbixiyaa?

Magaalooyinka qaar waxay yeelan karaan meelo kala duwan oo laga codbixiyo. Si aad u hesho meesha aad ka codaynayo:

- Wac xafiiskaaga Dowladda Hoose.
- Booqo bogga: www.maine.gov/portal/government/edemocracy/voter_lookup.php

Xillima ayaan codayn karaa?

- Goobaha codayntu waxay furan yihiin 6:00 ilaa 10:00ka subaxnimo Maalinta Doorashada. Xilliga furista codaynta magaalooyinka oo dhani kama sinna.
- Dhammaan goobaha codaynta waxa la xiraa 8:00 fiidnimo.
- Haddii aad safka ku jirto 8:00 fiidnimo, lagaama celin doono inaad codbixiso, waanad codayn kartaa.

Sideen isaga ilaalin karaa dadka badan meeshan aan ka codaynayo?

- Iska ilaalinta COVID ayaa laga yaabaa inay gaabiyaan socodka codaynta.
- Maadaama dadku ay kala durki doonaanm waxa laga yaabaa in laymanku kula dheeraadaan iyagoo aan sidaa u dheerayn.
- Wuxaan kaga raysan kartaa walwalka ku qabsan kara adigoo horey isaga sii codeeya oo aan tagin goobta codbixinta.
- Warbixin dheeraad ah ka dheego BOGGA 20.

Inta aadan Codbixin

Maxaa diyaargarow ah ee magaalooyinku ka sameynayaan si looga badbaado COVID marka la tago goobaha codbixinta?

- Iyadoo la yareeyo dadka halmar ku wada sugar goobaha codbixinta.
- Sanduuqyada codaynta oo la kala durkiyo si loo kala fogaan karo.
- Iyadoo la nadiifiyo goobaha codaynta mar kasta oo qof isticmaalo.
- Iyadoo codbixiyeyaasha loo sheego inay xirtaan maaskaraati.
- Muraayado difaacaya kormeerayaasha doorashada.

Ma arki karaa xaashida doorashada codbixinta ka hor?

Haa, maamulka magaaladaadu waxay haysaa xaashi tusaale ah. Fiiri bogga internetka.

Inta aadan Codbixin

Maxaa dhacaya haddii magacayga laga waayo goobta codaynta?

- Karraaniga codaynta ayaa ku caawinaya.
- Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad is diiwaangeliso si aad u codayso. Wuxaad iska diiwaangelin kartaa goobta codbixinta. Waa inaad wadataa aqoonsi iyo wax muujinaya cinwaanka aad daggan tahay. Liisan dirawal oo cinwaankaaga saxda ahi ku yaallo ayaa shuruudda buuxinaya. Haddii kale buuggaaga bankiga ama biil laguugu soo diray cinwaankaaga cusub oo ay la socdaan kaarka sooshalka, warqad dhalasho ama liisanka kalluumaysiga/ugaarsiga.
- Haddii intaa howshaada lagu xallin waayo, waxad ridan kartaa “Codayn Dood ku Jirto”. Codayntaada maalinta codaynta waa la tirinayaa laakiin dib ayaa howshaada laga xallin doonaa.

Miyaan u baahanahay Aqoonsi?

Maya dadka reer Maine ee u diiwaangashan inay codeeyaan loogama baahna aqoonsi.

LAAKIIN, Waa inaad wadato aqoonsigaaga iyo caddayn cinwaankaaga (sida biil guri iyo liisankaaga wadista) haddii:

- Ay tahay markii kuugu horraysay ee aad codayso.
- Aad guurtay.
- Aad u baahan tahay inaad is-diiwaangeliso maalinta doorashada.

Ha walwalin- Qofkii xaq u leh inuu codaeeyo lagama celin karo.

Goobta Codaynta

Maxaan samaynayaa goobta codaynta?

- Raac calaamadaha kuu sheegaya meesha aad tagayso.
- Badiyaa dhulka ayaa la calaamaddiyaa si dadka loogu hago.
- Goobaha qaarkood waxay dadka u kala saaraan iyagoo isticmaalaya magaca awowga.
- Badankoodu waxay kala leexin doonaan meesha laga galayo iyo meesha laga baxayo.
- U tag karraaniga doorashada. U sheeg magacaaga iyo ciwaankaaga.
- Magacaagu wuxu ku jiraa liiska haddii aad isu diiwangelisay codaynta.
- Karraaniga doorashada ayaa ku siinaya warqadda/warqadaha codaynta.
- Warqadda codayntu waa ta aad ku suntayso codkaaga.
- Wawaad geli doonta qol gooni ah si aad codkaaga u dhiibto.
- Markaad dhamayso, wawaad warqadda codaynta ku ridi doontaa sanduuq ama mashiin.

Maxaa dhacaya haddii aan caawin u baahdo goobta codaynta?

Weydiiso karraanigu inuu ku caawiyo haddii aad su'aal qabto.

Karraaniyada doorashadu waxay kaa caawin karaan buuxinta ama warqad kale ayey ku siin karaan haddii aad u baahato. Noqon dooni maysid qofka kaliya ee su'aal qaba!

Sideen u buuxin doonaa warqadda codaynta?

- Warqad kasta ee codayntu waxay kuu tilmaami doontaa sidaad u buuxiso doorashadaada.
- Wawaad murashaxiinta qaarkood u isticmaali doonta doorashada kala sarreysa. Wawaad kala sarraysiin kartaa inta murashax ee aad doonto, mid kaliyana waad calaamadin kartaa.
- Haddii aad wax su'al ah qabto, weydi karraaniga doorashada.
- Khasab ma aha inaad wax walba cod ka dhiibato. Kaliya qaybaha aad ka codayso ayuunbaa laguu xisaabi doonaa.
- Iska hubi warqaddaada doorshada.
- Haddii aad khalad samayso, wawaad waydiisan kartaa warqad kale.

Goobta Codaynta

Ka warran haddii aanan akhriyi karin warqad?

Waxaad caawimaad ka heli kartaa:

- Saaxiibkaa ama qaraabada. Qofka ku caawinaya Khasab ma aha inuu codeeyo ama qaangaar yahay.
- Shaqaalaha doorashada.
- Shirkadda aad u shaqayso ama ururkaaga shaqaaluhu kaama caawin karo codaynta.
- Mashiin khaas ah ayaa jira haddaad u baahan tahay far waaweyn ama inaad dhagaysato su'aalihi oo laguu akhriyayo. (Faahfaahin dheeraad ah ka fiiri BOGGA 14.)

Qalabka ExpressVote

Waa maxay ExpressVote?

ExpressVote (Codbixinta Dagdagga ah) waxa loogu talagalay dadka ay dhib ku tahay inay akhriyaan warqadda doorashada. Waa qalab loo isticmaali karo inuu kaa caawiyo akhrinta ama dhagaysi warqadda doorashada lagu buuxiyo.

Ma isticmaali karaa qalabka ExpressVote goobtayda codbixinta?

- Haa, waxaad ku isticmaali kartaa qalabka ExpressVote goob kasta oo codbixin laga sameeyo.
- U sheeg karraaniga doorashada inaad u baahan tahay isticmaalka ExpressVote.
- Karraaniga ayaa kuu diyaarinaya si aad u isticmaasho ExpressVote.

Siduu u shaqeeyaa ExpressVote?


- ExpressVote wuxuu leeyahay shaashad iyo madbacad daabacda xaashida cobixinta.
- Warqadda codbixinta waxa lagu arki karaa shaashad iyadoo far waaweyn ku qoran.
- Waxa laguu akhriyi karaa adigoo isticmaalaya sameecado lagu siinayo.

Sideen doorashada u samayn karaa anigoo isticmaalaya ExpressVote?

Waxaad ku codayn kartaa adigoo:

- Taabanaya shaashadda.
- Iisticmaalaya teeb xarfo ka nooc duwan xarfaha caadiga ah, iyo mid farta indhooleyaasha leh.
- Adigoo isticmaalya badhan leh Haa oo cagaar ama Maya oo guduud ah.
- Marka aad dhammayso waxa mashiinku daabacayaa warqad doorashadaadi ku astaysan tahay.
- Waxaad warqaddaada doorashada ku ridaysaa sanduuqa ama mashiinka lagu tiriyo.

Qalabka ExpressVote



BIDIX: ExpressVote sidan ayuu u eyyahay. Waxayna yaallaan goob kasta oo laga codaynayo. Sameecadana waa yaallaan.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan habkan ExpressVote, ka fiiri: www.maine.gov/sos/cec/elec/voter-info/accessiblevoting.html

Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa

Waa maxay Codbixinta Doorashada Kala Sarreysaa?

Doorashada Kala Sarreysaa (Ranked Choice Voting) waxay suuragelisaa inuu qofku wax u doorto sida uu jecelyahay.

Siday u shaqeysaa Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa?

- Codbixiyeyaashu waxay kala hormariyaan murashixiinta siday u kala jecel yihii: codka koobaad, ka labaad ka saddexaad, iyo wixii ka sareeyaa.
- Marka la tiryo waraaqaha codaynta oo dhan, haddii hal murashax helo in ka badan 50% codka darajada koobaad wuu guulaysanayaa.
- Haddii uu murashaxna heli waayo 50% oo ah codadka heerka koobaad, murashaxa hela codadka ugu yar ayaa loo aqoonsanayaa in laga adkaaday.
- Codbixiyeyaasha doortay murashaxa helay codadka ugu yar ayaa dabadeedna codkooda loogu darayaa qofka ay siiyeen heerka labaad ee doorashada.
- Waxa sidaa lagu wadayaa ilaa laba murashax oo kaliya soo haraan. Ka ugu cod bataana sidaasuu ku badinayaa.

Maxaan murashaxiinta u kala siinayaa cod darajoojin kala sareeyaa?

- Haddii laga adkaado qofkii aad siisay doorashada koobaad, codayntaadu waxay wali wax tari kartaa qofka aad siisay codka heerka ku xiga.
- Waxba yeeli mayso qofka aad ugu jeclayd inaad dadka kale siiso codad ka hooseeya. Codadkaas waxa kaliya oo la xisaabinayaa haddii murashaxaagii laga adkaado.
- Waxba u tari mayso murashaxii aad jeclayd haddii kaligii uun aad ku qorto warqadda doorashada. Mar walba doorashadaada heerka koobaad waa la la xisaabinayaa ilaa murashaxaaga laga adkaado.

Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa

Sideen isaga ilaaliyaa inaan khaldo warqaddayda doorashada?

- Sakadda gudban ee kasta hal goobo kaliya ka calaamadi.
- Sakadda qotonta ee kasta hal goobo kaliya ka calaamadi.
- U codee doorasho kala darajo sarreeya intii murashax ee aad doonto.
- Khasab ma aha murashax aadan rabin inaad ku darto doorashada heerarka kala sarraysa.
- Haddii aad khalad sameyso, karraaniga weydiiso warqad cusub.
- Caawimaad waydiiso. Kaliga ma noqon doontid qofka su'aal qabaa!

Waakan tusaale sidaad u kala sarraysiin karto murashaxiinta aad jeceshahay:

	Doorashada 1aad	Doorashada 2aad	Doorashada 3aad
 Murashaxa koobaad	<input type="radio"/>	<input checked="" type="radio"/>	<input type="radio"/>
 Murashaxa labaad	<input checked="" type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
 Murashaxa saddexaad	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input checked="" type="radio"/>

SARE: Tusaalah, murashaxa 2aad ayaa ah doorashadaada koobaad, goobaabinta ku aaddan ayaana la buuxiyey. Murashaxa 1aad ayaa ah doorashada 2aad. Murashaxa 3aad ayaa ah doorashada 3aad.

Haddii aad hubto murashaxa aad u jeceshahay oo aad rabto inaad midkaa kaliya uun u codayso, markaa waxaad buuxinaysaa goobaabinta ku aaddan “doorashada 1aad” (ikhiyaarka 1aad) oo kaliya. Inta kalena waxaad iskaga tagi kartaa iyagoo madhan. Haddii aad doonayso inaad doorato laba murashax oo aad kala horraysiisay oo kaliya, waxaad buuxinaysaa goobaabinta ku aaddan “doorashada 1aad” iyo ta “doorashada 2aad” oo kaliya, waxaanad iskaga tagaysaa ta “doorashada 3aad” oo madhan.

Warqad Doorasho oo Tusaalayn ah

<u>Instructions to Voters</u>																			
		President	Vice President	1st Choice	2nd Choice	3rd Choice	4th Choice	5th Choice	6th Choice	U.S. Senator	1st Choice	2nd Choice	3rd Choice	4th Choice	5th Choice	Rep. to Congress District 1	1st Choice	2nd Choice	3rd Choice
To vote, fill in the oval like this:	<input checked="" type="radio"/>	Biden, Joseph R.	Harris, Kamala D.	0	0	0	0	0	0	Collins, Susan Margaret	0	0	0	0	0	Allen, Jay T.	0	0	0
To rank your candidate choices, fill in the oval:		De La Fuente, Roque "Rocky"	Richardson, Darcy G.	0	0	0	0	0	0	Gideon, Sara I.	0	0	0	0	0	Pingree, Chellie M.	0	0	0
• In the 1st column for your 1st choice candidate.		Hawkins, Howard	Walker, Angela Nicole	0	0	0	0	0	0	Linn, Max Patrick	0	0	0	0	0	Write-in	0	0	0
• In the 2nd column for your 2nd choice candidate, and so on.		Jorgensen, Jo	Cohen, Jeremy	0	0	0	0	0	0	Savage, Lisa	0	0	0	0	0				
Continue until you have ranked as many or as few candidates as you like.		Trump, Donald J.	Pence, Michael R.	0	0	0	0	0	0	Write-in	0	0	0	0	0				
Fill in no more than one oval for each candidate or column.		Write-in		0	0	0	0	0	0										
To rank a Write-in candidate, write the person's name in the write-in space and fill in the oval for the ranking of your choice.																			

Warqadda Doorashada ee Maine waxay leedahay:

- Shan Murashax oo Madaxweyne
- Afar Murashax ee Golaha Odayaasha ee Maraykanka
- Laba Murashax oo Golaha Shacabka ee Maraykanka Deeganka 1

Waxa kale oo aad galin kartaa magac aad adigu dooratay mid walba oo tartannadaas ah.

Booqo www.Vote411.org. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee tartannadaas ah, sida murashaxiinta xildhibaannada gobolka, kuwa golaha odayaasha ee gobolka, golaha maamulka Magaalada, Guddiyada Waxbarashada, iyo waxyaabo kale oo badan.

Warqad Doorasho oo Tusaalayn ah

<u>Instructions to Voters</u>		President Vice President						U.S. Senator						Rep. to Congress District 2		
		1st Choice	2nd Choice	3rd Choice	4th Choice	5th Choice	6th Choice	1st Choice	2nd Choice	3rd Choice	4th Choice	5th Choice	1st Choice	2nd Choice	3rd Choice	
To vote, fill in the oval like this ●		Biden, Joseph R. Harris, Kamala D. Democratic	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0	Crafts, Dale John Labour Republican	0	0	0
To rank your candidate choices, fill in the oval:		De La Fuente, Roque "Rocky" Richardson, Darcy G. Alliance Party	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0	Gideon, Sara I. Freeport Democratic	0	0	0
• In the 1st column for your 1st choice candidate.		Hawkins, Howard Walker, Angela Nicole Green Independent	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0	Linn, Max Patrick Bar Harbor Independent	0	0	0
• In the 2nd column for your 2nd choice candidate, and so on.		Jorgensen, Jo Cohen, Jeremy Libertarian	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0	Savage, Lisa Solon Independent	0	0	0
Continue until you have ranked as many or as few candidates as you like.		Trump, Donald J. Pence, Michael R. Republican	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0	Write-in	0	0	0
Fill in no more than one oval for each candidate or column.		Write-in	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0				
To rank a Write-in candidate, write the person's name in the write-in space and fill in the oval for the ranking of your choice.																

Warqadda Doorashada ee Maine waxay leedahay:

- Shan Murashax oo Madaxweyne
- Afar Murashax ee Golaha Odayaasha ee Maraykanka
- Laba Murashax oo Golaha Shacabka ee Maraykanka Deeganka 1

Waxa kale oo aad galin kartaa magac aad adigu dooratay mid walba oo tartannadaas ah.

Booqo www.Vote411.org. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee tartannadaas ah, sida murashaxiinta xildhibaannada gobolka, kuwa golaha odayaasha ee gobolka, golaha maamulka Magaalada, Guddiyada Waxbarashada, iyo waxyaabo kale oo badan.

Codaynta Adigoo aan Joogin

Waa maxay codaynta adigoo aan joogin?

- Haddii aad doonayso inaad codayso Maalinta Codbixinta ka hor, waxaad isticmaali kartaa warqadda codaynta Adigoo maqn.
- Haddii aad doonayso in warqaddaada codaynta boostada laguugu soo diro oo aad doonayso inaad boostada ku soo riddo, waxa fiican inaad goor hore codsato.
- Wuxaad kale oo aad cadsan kartaa inaad soo qaadato.
- Codaynta adigoo maqn waxa hadda la cadsan karaa ilaa Jimcaha, Oktoobar 30da.
- Warqadahaan waxa la bilaabi doona in la soo diro 30 bari ka hor maalinta doorashada.

Sideen ku heli karaa warqadda lagu codeeyo adigoo maqn?

Haddii la gaaro Jimcaha Oktoobar 30keeda, waxaad u baahn doontaa cudurdaar si laguu siiyo warqadda lagu codeeyo adigoo maqn. Haddii aad xaq u leedahay inaad codayso, waxaad cadsan kartaa warqadda codaynta adigoo maqn, adigoo:

- Telefoon kaga cadsanaya karraaniga Dowladda Hoose ugu danbayn 5:00 galabnimo ee Oktoobar 29.
- Adigoo taga xafiiska dowladda hoose ee magaaladaada ugu danbayn 5:00 galabnimo ee Oktoobar 30.
- Adigoo boostada ku diraya intaad online ka daabacdo, buuxisana foomkan:
www.maine.gov/sos/cec/elec/upcoming/pdf/absballot1120.pdf
- Oktoobar 29 adigoo isticmaalaya foomkan ku jira: <https://apps.web.maine.gov/cgi-bin/online/AbsenteeBallot/index.pl>

Ka digtoonow, haddii aad sugto waxa laga yaabaa in waraaqahaaga doorshada ee boosta ku imanayaa kaa soo gaari waayaan ama ay ku tagi waayaan xilliga kama danbaysta ah ee loo qabtay. Ruux qoyskaaga ka mid ah ayaa kuu dalbi kara warqadaha lagu codeeyo adigoo maqn. Wixii faahfaahin ah, wac karraaniga xafiiska dowladda hoose ee magaaladaada.

Dadka ku jira ciidamada diryska leh iyo dadka dibadda ka soo codbixinayaan waxay leeyihiin xeerar ka duwan. Ka tixraac tilmaamaha Xogyaha Gobolka ee Maine halkan:

www.maine.gov/sos/cec/elec/voter-info/uocava.html

Codaynta Adigoo aan Joogin

Haddii aad tahay codbixiye qaba laxaad la'aan ay ku dhibayso isticmaalka waraaqaha lagu codbixinayo, waxaad ka codsan kartaa codaynta la fududeeyey ee lagu codeeyo adigoo maqan halkan:

<https://apps.web.maine.gov/cgi-bin/online/AbsenteeBallot/index.pl>

Maxaan ku sameeyaa warqadda codaynta adigoo maqan?

- Buuxi waqadda.
- Ku rid bakhshadda khaaska ah, dabadeedna saxeex baqshadda.
- **Iska ilaali! Dad badan ayaa illooba inay baqshadda saxeexaan.**
- Ku soo celi karraaniga dowladda hoose ee magaaladaada ugu danbayn 8:00 fiidnimo Maalinta Doorashada.
 - + Waxaad ku soo celin kartaa codbixintaada boostada; todobaad ka hor soo celi waaba intaas oo habsaan dhacee.
 - + Adiga ama qof ka tirsan qoyskaaga ayaa qaadi kara oo ku celi kara xafiiska dowladda hoose marka doorashada la furo.
 - + Magaaloojin badan ayaa ayaa leh sanduuq lagu ridi karo warqadaha doorashada xataa mararka xafiisku xidhan yahay.

Qof aan ka tirsanayn qoyskaaga ayaa kuu soo celin kara laakiin waxad markaa u baahanaysaa inay laba markhaati baqshadda saxeexaan.

Sideen u codsan karaa warqadaha codaynta adoo maqan haddii la gaaro Jimcaha, Oktoobar 30keeda?

Haddii aad rabto warqada codaynta adigoo maqan inta ka danbaysa Jimcaha ka horreeya doorashada, wac ama tag xafiiska dowladda hoose ee magaaladaada oo buuxi codsi khaas ah.

Codsigaaga waa inay ku jiraan sababahan midkood:

- Wuxaad ka maqnaan doontaa magaalada Maalinta Doorashada sabab kadis ah awgeed.
- Wuxaad qabtaa laxaad la'aan.
- Wuxaad deggen tahay jasiirad mana soo gaari kartid goobta codaynta Maalinta Doorashada.
- Jirro ayaa ku haysa kamana soo bixi kartid guriga ama goobta lagugu daaweynayo.
- Karraaniga baladkaagu waa in uu helo codayntaada ugu danbayn 8da fiidnimo Maalinta Doorashada ee Noofembar 3, 2020.

Murashaxa Madaxweynenimo

MADAXWEYNAHA DOWLADDA MARAYKANKA

Muddada (inta sano ee uu shaqanayo): 4 sano. Mushaharka: \$400,000



Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa

Codbixiyeyaasha Maine waxay isticmaali doonaan Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa si ay u kala hormariyaan dadka ay rabaan inay u codeeyaan tartanka madaxweynaha ee Talaadada, Noofembar 3.

Khasab ma aha inaad taxdo sidaad u kala hormarinayso haddii aad hubto qofka aad kaalinta koobaad ugu codayn lahayd. Fiiri BOGAGGA 16-17 sida loo isticmaalo Doorashada Darajada Kala Sarrysa.

Madaxweynuhu waa Madaxa Fulinta ee Dowladda Maraykanka, Waana Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka-sida oo dhan. Isagoo ah Madaxa Fulinta, Madaxweynuhu wuxuu fuliyaa xeerarka, heshiisyada caalamiga ah, iyo amarka maxkamadaha, wuxuu diyaariyaa siyaadaha dowladda dhexe, diyaariyaa miisaaniyadda qaranka, wuxuuna magacaabaa saraakissya dowladda dhexe.

Madaxwynuhu waxa kala oo uu ansixiyaa ama ku gacansayraa xeerarka ay soo jeediya golayaasha baarlamaanku, wuxuna bixiyaa cafis. Maadaama u yahay taliyaha guud ee ciidamada qalabka-sida, wuxuu madaxweynuhu dagaal gelin karaa ciidamada. Dastuurka iyo xeerarka dowladda dhexe ayay ku qeexan yihiin awoodaha madaxweynuhu.

Doorashada Madaxweynaha Maraykanku waa mid aan toos aahayn. Dadweynuhu waxay u codeeyaan ergo ama doortayaal ka mid noqda Kalfadhiga Doorashada (Electoral College) oo u codeeya Madaxweynaha. Fadhiga Doorashadu wuxuu ka kooban yahay 538 xubnood. Gobol walba waxa loo qoondeeyey xubno le'eg inta Xildhibaan ugu jirta Baarlamaanka. Goballadu waxay leeyihii laba ergo oo u kala taagan labada xubnoon ee ugu jirta Golaha Odayaasha ama Guurtida iyo hal ergay oo mataal halkii xildhibaan kasta ee Golaha Shacabka (Iyadoo tirada Xildhibaannadu ku xiran yihiin tirada dadka ku nool gobol walba.) Maine waxay leeyihii afar ergay/doorte.

Madaxweynuhu waa inuu jiraa ugu yaraan 35 sano, Yahay Muwaadin u dhashay Maraykanka, kuna noolaa waddanka ugu yaraan 14 sano.

Murashaxa Madaxweynenimo

MURASHAXINTA: GOBOLKA MAINE WAXA DOORASHADAN U TAAGAN SHAN MURASHAX.



JOE BIDEN
Democrat



ROQUE DE LA
FUENTE
Alliance Party



HOWARD
HAWKINS
Green
Independent



JO JORGENSEN
Libertarian



DONALD
TRUMP
Republican

Golaha Odayaasha/AQALKA SARE ee Maraykanka

MUDANE AQALKA SARE EE MARAYKANKA

Muddada (inta sano ee uu shaqeynayo): 6 sano
Mushahar: \$174,000



Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa

Codbixiyeyaasha Maine waxay isticmaali doonaan Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa si ay u doortaan xubin Aqalka Sare ee Maraykanka Talaadada Noofembar 3.

Khasab ma aha inaad taxdo sidaad u kala hormarinayso haddii aad hubto qofka aad kaalinta koobaad ugu codayn lahayd. Fiiri BOGAGGA 16-17 sida loo isticmaalo Doorashada Darajada Kala Sarrysa.

Golaha Odayaasha Aqalka Sare ee Maraykanka waxay qoraan oo ay u codeeyaan xeerarka. Shaqadan waxay la wadaagaan Xildhibaanada Golaha Shacabka (Aqalka Hoose). Waxay baaritaan ku sameeyaan arrimaha muhiimka u ah waddanka waxayna qabtaan dhagaysi furan. Golaha Odayaashu waxay ansixiyaan heshiisyada lala galo dalalka kale. Wixa kale oo ay ansixiyaan golaha wasiirrada, garsoorayaasha maxkamadaha federaalka, iyo safiirrada uu madaxweynuhu doorto.

Muwadiniinta gobol kasta waxay dooranayaan laba Mudane ee Golaha Sare oo gobolka oo dhan matalaya. Waxay shaqaynayaan 6 sano. Codbixiyeyaashu waxay dooranayaan Mudanayaasha Golaha Sare inta jeer ay doonaan. Golaha sare wuxuu ka kooban yahay 100 xubnood, gobol walbana waxa ka yimaad laba xubnood. Labadii sanaba waxa la doorta saddex meelood hal ka mid ah Aqalka Sare. Mudanayaashu waa inay yihiin ugu yaraan 30 jir, haysta jinsiyadda Maraykanka ugu yaraan 9 sano, oo daggan gobolka laga soo dooranayo.

MURASHAXIINTA: Maine waxa u taagan Aqalka Sare afar murashax.



SUSAN COLLINS
Republican



SARA GIDEON
Democrat



MAX LINN
Independent



LISA SAVAGE
Independent

Murashaxiinta Aqalka Hoose ee Maraykanka

XILDHIBAAN MARAYKANKA

Muddada (inta sano ee u shaqeeyo): 2 sano
Mushaharka: \$174,000



Votación por Orden de Preferencia

Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa Codbixeyaasha Maine waxay isticmaali doonaan Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa si ay u xushaan xildhibaannada Talaadada, Noofembar 3.

Khasab ma aha inaad labadaba u codayso haddii aad hubto qofka aad rabto inuu noqdo doorka u sarreyya. Faahfaahin dheeraad ah ka fiiri BOGGA 16-17 sida loo isticmaalo Codbixinta Doorashada Kala Sarreysa.

Xubnaha Xildhibaannadu waxay qoraan, ansixiyaanna xeerar. Xilkan waxay la wadaagaan Xubanaha Golaha Odayaasha. Waxay baaraan arrimaha muhiimka u ah waddanka waxayna qabtaan dhagaysi u furan dadweynaha. Ansixinta miisaaniyadda qaranku waxay ka billaabataa Aqalka Hoose (Golaha Shacabka), waana inay ansixiyaan Aqalka Sare (Golaha Guurtida).

Dowladda maraykanka waxa loo qaybiyey 435 deegaan oo kursi xildhibaan leh. Deegannada waxa lagu saleeyaa inta qof ee ku nool gobolka. Gobol kastaa wuxuu ugu yaraan hal xildhibaan ku leeyahay golaha shacabka. Maine waxay leedahay laba. Dhammaan xildhibaannada waxa la doortaa sannado is le'eg. Codbixiyeyaashu waxay dooran karaa karaan xildhibaannada Golaha Shacabka inta jeer ee ay doonaan. Xildhibaanka Golaha Shacabka ee Maraykanku waa inuu ugu yaraan jiraa 25 sano, ahaa muwaaddin Maraykan ah ugu yaraan 7 sano, daggan yahayna gobolka laga dooranayo.

MURASHAXIINTA: Waxa jira laba murashax oo Maine u taagan doorasha Golaha Shacabka.



HOUSE DISTRICT 1

JAY ALLEN
Republican



HOUSE DISTRICT 1

CHELLIE PINGREE
Democrat



HOUSE DISTRICT 2

DALE CRAFTS
Republican



HOUSE DISTRICT 2

JARED GOLDEN
Democrat



SANDUUQA WACYIGELINTA EE URURKA DUMARKA CODEEYA EE MAINE (THE LEAGUE OF WOMEN VOTERS OF MAINE EDUCATION FUND)

Sanduuqa wacigelinta Ururka Haweenka Codeeya ee Maine wuxuu sameeyaa adeeg wacyi gelin bulshada ah oo codaynta ku saabsan. Waa urur dhexdhedaad ah, samafal ah, oo ka shaqeeya wacyigelinta bulshada dhinaca maamulka dadweynaha kaasoo:

- Dhisa ka qaybqaadashada bulshada ee habka dimoqraadiyeed.
- Si dhexdhedaad ah u darasta arrimaha muhiimka u ah bulshada dhammaan heerarka dowladeed.
- U suurogelisa in dadku xal wanaagsan u helaan arrimaha siyaasiga ah ee dadweynaha taasoo ku salaysan aqoon iyo ka fogaanta colaaddaha.

Wixii caawimaad ah noogu soo hagaajiya LWVME Education Fund, oo ah urur samafal oo buuxiya xeerka 501 (c)(3), canshuur-dhaafna leh meesha sharcigu oggolyahay.

Ururka Haweenka Codeeya ee Maine waa urur siyaasadeed oo dhexdhedaad ah oo dhiirigeliya si firfircoон dowladda looga qaybqaato, ka shaqaysa in si fiican loo fahmo arrimaha muhiimka ah ee siyaasadaha maamulka dadweyne isla markaana siyaasado dadweyne iyagoo isticmaalya wacyigelin iyo u hadal. Waligayo xisbi iyo murashax ma mucaaradno.

Tabarrucaadka la siiyo Ururka Haweenka Codeeya ee Maine ma laha canshuur dhaaf.

Ururku haween kaliya uma taagna! Qof kasta oo ururka ulajeeddooyinkiisa aaminsani xubin way ka noqon kartaa.

Nagula soo biir Ururka Haweenka Codeeya ee Maine halkan: lwvme.org/join

lwvme.org
info@lwvme.org

